Caafimaad+ iyo IDS
Qormada doodii 8aad
Febraayo 2026

# Markay Roobabkii Curan Waayeen: Gurmadka Bulshada ee Abaaraha

## Sheeko ka timid Shan Degmo oo Koonfurta Soomaaliya ah

Koonfurta Soomaaliya oo dhan, markii ay baaqdeen roobabkii Gu'ga iyo Dayrta, dhulkii wuu engagay. Cowskii baa engegay, webiyadiina way gureen. Ceelashii biyihii waa ka dhammaadeen ilaa ay qalaleen. Ka hor intaan xaalad degdeg ah si rasmi ah loogu dhawaaqin, qoysasku waxay bilaabeen inay nolosha la tacaalaan.

Laga bilaabo **Kismaayo** iyo **Afmadow** ilaa **Wajid**, **Luuq** iyo **Doolow**, shan degmo ayaa wajahaya isku dhibaatada abaarta. In kasta oo dhulka iyo deegaanku ku kala duwan yihiin, sida xeebaha, webiyada, iyo dhulalka sare, haddana dadka deegaankaas waxaa mideeya dhowr waxyaabood: waddooyinka xoolaha maraan, isu-socodka suuqyada, xiriirka qoyska, iyo aadaanka salaadda ee waagu markuu baryo.

Tani ma ahan shan abaarood oo kala duwan. Waa hal abaar oo dhibaatadeedu saamaysay dad badan oo noloshoodu isku xiran tahay. Xiriiriyeyaasha bulshada (Community Facilitators) ee ka shaqeeya Hindisaha Marinka Gargaarka Bani'aadamnimada (HAI) ayaa nala wadaagaya sheekooyinka ay ka soo ururiyeen dadka ku nool shantaas degmo.

Bishii Nofembar: Tuulada Fumo oo ku taal duleedka Kismayo, Maryan waxay bilawdey inay biyaha u daryeesho si ka adag sidii hore. Haanta biyaha waxay u samaysey qorshe: marka hore waa in la cabbo,

ka dib in lagu karsado, ugu dambeeyna in wax lagu dhaqdo. "Markaan joojinnay khasaarinta biyaha, waxaan istaagey is-qabqabsigii," ayay tiri. Hadalkeedu wuxuu la mid yahay maahmaahda oraneysa: "**Biyo la'aan waa nolol la'aan**." Laakiin Maryan waxay na tustay macne kale: haddii aan biyo lagu heshiin, nabadna ma jirto.

Dhinaca miyiga, Cabdi oo reer miyi ah ayaa isna bilaabay inuu xoolihiisa xisaabiyo si uu u badbaadiyo. Isagoo markii hore lahaa tiro badan oo geel ah, wuxuu hadda go'aansaday inuu iibiyo inta aysan aad u daciifin. "**In qaar la iibiyo ayaa ka fiican in dhammaantood la aaso**," ayuu yiri. Dadka deriska ah waxay heshiis ku yihiin xilliyada xoolaha la daaqinayo. Kuwii xoogga lahaa waxaa loo diray dhul fog oo daaq leh, halka kuwii daciifka ahaa lagu hayo meelaha biyaha u dhow.

Gobolka Jubbada Hoose, dad badan ayaa u guuray dhanka Webiga Jubba, kaas oo ah isha nolosha

ee isku xirta degmooyinka. Beeraleydu waxay u ogolaadeen dadka xoolalayda ah inay xoolahooda daajiyaan beerahooda engegan, si looga badbaado abaarta. Kuwa aan dhulka lahayn waxay daaqsinka ku helaan iyagoo ka shaqeeya beeraha si loogu beddelo xuquuqda daaqsinka. Rooble ayaa yiri, "**Markii uu dhulka naga xirmo, gacmaheena ayaan isu furnaa**."

Dadku markay guurayeen, waxay aadeen meelaha ay qaraabadoodu deggen yihiin si ay u caawiyaan.

Ehelada magaalooyinka deggan ayaa biil yar u soo dirayay qaraabadooda, dadka qurba-joogta ahna si hoose ayay lacago u soo direen. Diinta iyo aaminaadda Alle ayaa hagayay guuritaanka dadka; reeruhu intaysan raran agabkooda, waxay isugu baxayeen duco si uu Alle roob ugu soo deeqo.

Degmo kasta, waxaa aad u kordhay is-caawinta ay diintu ina fartay. Zakada iyo Sadaqada waxay isku beddeleen raashin, biyo, iyo shidaalka matoorada. Degmada Wajid, tuulooyinka waxaa looga dhawaaqay guddiyo ururiya Qaaraanka, oo ah lacag, dalag, iyo cunto la iska soo ururiyay, ka dibna la siiyay dadka ugu dhibaataysan.

Tuulada Roose Garasle, dadku waxay isku caawiyeen raashin ay hore ugu kaydsadeen godad dhulka hoostiisa ah oo la yiraahdo Baqaar. Godadkan waxaa loogu talagalay in raashinka lagu keydiyo xilliyada adag. Zakada iyo Sadaqada si hoose ayaa loogu sii daray baqaarradaas, si loogu isticmaalo xilliga baahida jirto.

Markii ay abaartu aad u xumaatay, dadku waxay fureen Baqaarradii (godadkii raashinka lagu kaydin jiray). Galaydii iyo dalagii mudada dheer dhulka hoostiisa ku aasnaa, ayaa hadda loo soo saaray si loogu dubo rooti ay dadku cunaan. Waxaa hagayay maahmaahda oraneysa: "**Nin aan wax kaydsan, ma helo wax uu qaybsado**." In raashinka la kaydiyo ma ahayn hunguri-nimo, balse waxay ahayd deeqsinimo loogu talagalay maalinta dhibaatadu timaado.

Tuulada Gomoro, oo 30 kiiloomitir u jirta degmada Wajid, dadka deegaanka iyo ganacsatada ayaa isku daray lacag si ay u qotaan ceel-biyeed. Beeraleyda, ganacsatada, iyo dadka qurba-joogta ah ayaa dhammaan gacan ka gaystay. Ceelkaas wuxuu hadda biyo siiyaa meelihii ay ka gureen biyihii roobka ee harooyinka ku jiray.

Tuulada Dhato, Cabdi wuxuu maalin kasta kici jiray aroor hore si uu ugu safro Gomoro. Wuxuu baaskiilkiisa ku soo rari jiray 100 litir oo biyo ah oo ku jira caagado  ku xiran baaskiilka. Socodkiisii uu markii hore naftiisa uun ugu adeegi jiray, wuxuu hadda u beddelay gurmad weyn oo uu u qabanayo bulshada xilligan abaarta ah.

Magaalada Wajid dhexdeeda, ganacsigii wuxuu isu beddelay gurmad bani'aadamnimo, ka dib markii koox ganacsato ah ay lacag isku dareen si ay biyo-dhaamin u sameeyaan. Waxaa halkan ka dhashay isbeddel cusub: dhibaatadu waxay dadka bartay inay qaataan kaalin ka duwan kuwii hore. Ganacsatadii waxay noqdeen deeq-bixiyayaal, dhalinyaradii waxay noqdeen kuwo gurmadka geeya, beeraleydiina waxay u weecdeen xoolo-dhaqato, halka haweenkiina ay noqdeen kuwa isku-dubbarida shaqada.

Markii ay biyo-dhaamintu bilaabatay, waxaa dhashay muran ku saabsan safafka iyo baaxadda weelasha biyaha lagu qaato. Sahra, oo ah hooyo leh shan carruur ah, horayna ganacsato u ahayd, ayaa u istaagtay inay xal keento. Dadku aad ayay u aaminsanaayeen Sahra. Waxay samaysay liis ay ku qoran yihiin qoysaska, waxayna mudnaanta siisay dadka waayeelka ah iyo kuwa carruurta yaryar leh, iyadoo qoys kasta u qabatay waqti go'an si looga baaqsado saxmadda iyo ciriiriga.

Sahra waxay garab istaagtay dhalinyaradii iskood u shaqaynayay ee biyaha qaybinayay, waxayna maalin kasta warbixin siinaysay guddiga abaaraha. Maalin galab ah, markii ay biyuhu yaraadeen, Sahra si deggen ayay ula hadashay darawallada booyadaha, waxayna qaboojisay dadkii sugayay iyadoo u sheegtay in biyo kale ay dhowaan imaan doonaan. Waxay ku tiri: "**Haddii aan isku buuqno, wax xalismaya malahan. Haddii aan qorshayno, biyo ayaa no harayaan**."

Maamulkeeda awgiis, qaybintii biyuhu waxay noqotay mid nidaamsan, cad, oo caddaalad ah. Haweenku kaliya ma ahayn kuwa la caawiyo, balse waxay noqdeen kuwa maamula gurmadka oo dhan.

Tuulada Dhiigtar ee degmada Doolow, oo 20 kiiloomitir u jirta isha biyaha ee ugu dhow, xoolihii waxay noqdeen kuwo aad u daciif ah oo aan socon karin. Odayaashii, culimadii, haweenkii, iyo dhalinyaradii ayaa isugu yimid shir. Ma aysan sugin hay'ado gargaar. Hal booyad oo biyo ah waxay joogtay $100, taas oo qoysaska badankood aysan kaligood awoodin. Toddobaatan qoys ayaa midkiiba bixiyey $5. Waxay qoteen godad waaweyn iyagoo is-xilqaamaya, waxayna ku gogleen bacaha bageetada si biyaha booyadaha loogu kaydiyo si ammaan ah.

Waxay doorteen guddi si hufan u maamula qaybinta biyaha. Qoysaskii aan awoodin inay wax ku darsadaan lacagta lagama saarin liiska, ee biyaha waa lala qaybsaday si bilaash ah. Haweeney kulanka joogtay ayaa soo xigatay maahmaah la yaqaan oo oraneysa: "**Walaal la'aani waa cidlo**." Guddigii abaaraha ayaa cidladii u beddelay wadajir. Biyo-dhaamintii todobaadlaha ahayd waxay sii socotay intii lacagtu u saamaxaysay. Nidaamkaasna wuu  shaqeeyey.

Bishii Janaayo 2026, magaalada Afmadow, waxaa isugu yimid guddi abaaraha ka shaqeeya oo ka kooban 15 xubnood. Xubnahaas waxaa ku jiray odayaal,

imaamyo, haween, aqoonyahanno, dhalinyaro, iyo ganacsato. Waxay doorteen guddoomiye, ku-xigeen, iyo khasnaji. Habaynta guddigu waxay ahayd mid muhiim ah. Biyaha ayay u aqoonsadeen inay yihiin waxa ugu muhiimsan. Ceelka deegaanku wuxuu u baahnaa shidaal, guddiguna waxay iibsadeen toddoba foosto. Markii ugu horreysay toddobaadyo ka dib, biyihii ayaa si bilaash ah ugu socday qoysaska iyo xoolahaba. Biyahaas bilaashka ah ma ahayn kaalmo dibadda ka timid, balse waxay ahayd naf-hurnimo ay dadku isku dareen.

Guddigu waxay lacago ka soo ururiyeen dadka deegaanka, ganacsatada, iyo qurba-joogta. Lacagta ugu yar ee qofku bixinayay waxay ahayd $15, muddo yar gudahoodna waxay ururiyeen $90,000. Waxay sidoo kale ururiyeen cunto, iyagoo gargaar gaarsiiyey 700 oo qoys. Caafimaadkana lagama tegin; waxay kireeyeen gaari ka fogeeya xoolaha bakhtiyay meelaha dadku deggen yahay si looga hortago cudurrada. Adkaysigii bulshadu wuxuu hadda isku beddelay maamul iyo kala dambayn.

Doolow, abaabulku wuxuu ahaa mid ballaaran oo qorshaysan. Culimada, aqoonyahannada, iyo qaybaha bulshada ayaa dhisay guddi rasmi ah. Lacag ururintii ayaa sii korortay markii bishii Ramadaan soo dhowaatay. Biyo-dhaaminta iyo gargaarka kale waxaa loo arkay inay yihiin Cibaado, ee ma ahan kaliya badbaado. Diinta Islaamku kaliya ma qaboojin dadka, ee waxay kaloo noqotay mid isku xirta shaqada. Masaajidda waxay noqdeen meelo macluumaadka lagu wadaago, khudbaduhuna waxay xoojiyeen wadajirka. Sadaqadu waxay ka gudubtay xiriirkii qabiilka. Maahmaah inta badan la xiganayay ayaa oraneysa: “**Roob la’aantu waa imtixaan, wadajirku waa jawaab**.” Markii uu heerka biyaha webigu hoos u dhacay, dadku waxay sii kordhiyeen is-caawinta.

Roobkii wali kuma soo laaban shantii degmo. Meel kasta, bulshooyinku waxay soo sheegayeen inay marayaan heerkii ugu xumaa ee abaarta. Hay’adihii gargaarka inta badan ma joogin. Wasiirro ka tirsan Jubaland ayaa yimid Doolow horraantii Febraayo 2026 si ay u arkaan sida dadku ula tacaalayaan abaarta. Guddigii abaaraha ee Doolow ee la dhisay bishii hore ayaa wasiirradii ku yiri: “**Shan maalmood gudahood, waxaan ururinnay $8,000. Ma sugayno in dawladdu wax noo qabato ama wax na siiso. Waan ognahay waxa loo baahan yahay, waana abaabulannahay. Idinkuna ma nala qayb qaadan kartaan?**” Wasiirradii waxay ku jawaabeen: “**Waxba ma hayno**.” Hay’adihii NGO-yada ee goobta joogayna waxay sidoo kale yiraahdeen: “**Lacag noo diyaar ah ma jirto**.”

Guddigii wasiirrada ahaa ee Jubaland ka socday, kuwaas oo ka koobnaa toddoba wasiir, waxay kormeer ku mareen degmooyinka. Laakiin safarkoodu ma keenin wax taageero ah oo muuqata oo la siiyey bulshada. Waxay qireen in culimada iyo odayaasha deegaanku ay yihiin dadka ugu habboon ee hoggaamin kara abaabulka gurmadka. Magaalada Kismayo, culimadu waxay ku heshiiyeen in masaajid kasta laga ururiyo $2,000, waana lagu guulaystay. Odayaashu iyo culimadu, dadka ayay aaminaad ka haystaan; waxayna gaari karaan meelo aysan siyaasiyiinta iyo hay’aduhu gaari karin, si go’aan leh ayayna u shaqeeyaan.

Maadaama ay bulshadu is-abaabushay, ma jirin xeryo cusub oo barakac (IDP) oo la furay. Abaarihii hore, xeryaha barakacu waxay ahaayeen calaamadda ay hay’aduhu ku bilaabaan gargaarka. Laakiin markan, dadku waxay ku nagaadeen dhulkooda iyagoo isku duuban; bulshada, ganacsatada, iyo qurba-joogta ayaa is-garab istaagay. Waxay is-caawiyeen ka hor intaanay dhibaatadu isu beddelin barakac ballaaran.

Farriinta dadka ka timid waa mid casuumaad ah: Bulshadu mar hore ayay is-abaabushay, waxay garanayaan waxa muhiimka ah, waxayna kheyraadka u maamulaan si hufan iyagoo isticmaalaya waaya-aragnimadooda iyo diintooda. Hay’adaha dibadda ka imaanaya ma ahan inay keenaan fikrado kale ama ay u qabsadaan inay iyagu wax kasta ka ogyihiin. Waa inay garab istaagaan waxa ay bulshadu horay u bilowday. Waa in la maalgashado u-diyaar-garowga abaaraha iyo in la xoojiyo nidaamyada hadda shaqaynaya.

Abaartu tartiib ayay u timaadaa, laakiin dadkeennu horay ayay u bilaabaan gurmadka. Iyagoo kaashanaya iimaankooda, aqoontooda, iyo naxariistooda, ayay kaga jawaabaan dhibka. Roobkii waa baaqday, laakiin is-caawintii bulshadu ma baaqan.

Dadka akhrinaya qoraalkan waa inay aqoonsadaan hoggaanka bulshada Soomaaliyeed; waa dad awood u leh inay dhibka xalliyaan, ee ma ahan dhibbanayaal sugaya cid kale. Waa in la xoojiyaa xalalka ay bulshadu waddo, sida guddiyada abaaraha, kaydka raashinka (Baqaar), iyo masaajidda. Qurba-joogta, hay’adaha, iyo dawladduba waa inay garab istaagaan, codkana u kor u qaadaan dadaallada ay wadaan dadka deegaanka.

# Caafimaad+ iyo IDS

## Qormada doodii 8aad: Markay Roobabkii Curan Waayeen: Gurmadka Bulshada ee Abaaraha

### Sheeko ka timid Shan Degmo oo Koonfurta Soomaaliya ah

**Febraayo 2026**

Dood Qoraaleedkan wuxuu qayb ka yahay taxane qoraallo ah oo ay soo saarto Hindisaha Marinka Gargaarka Bani'aadamnimada (HAI), kuna qoran luqadda Ingiriisiga:

1. Humanitarian Access in Somalia - For whom? For what? How?
2. The Language of Change: What has language to do with humanitarian access?
3. The Humanitarian Reset Phase 2: How to get a locally led response?
4. The Organisational Reset
5. Four Prinicples of Community Engagement for Humanitarian Access
6. Building Bridges: Towards Community-centred Humanitarian Coordination
7. Bringing community into area-based coordination in Somalia

### Macluumaad dheeraad ah fadlan kala xiriir:

Caafimaad+: info@caafimaad-plus.org | https://caafimaad-plus.org/

Institute of Development Studies: scottvilliers@gmail.com | www.ids.ac.uk